

Soo jeedin

Annaga oo kala ah mudanayaasha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin;

Annaga oo tixraacayna distoorka JSL Qodobadiisa:

- 38aad.faq. 1aad oo tilmaamaysaa awoodda xeerdejinta Baarlanaka yo in awooddasi aanay cid kale u wareegi karin;
- Qod.1aad faq.2aad oo muujinaysa in awoodda iyo karaamada qarannimada uu leeyahay shacabku,
- Qod. 39aad iyo Qod.55aad oo ttilmaamaya in awoodda iyo hantida shacabkaba uu wakiil ka yahay Golaha Wakiilladu,
- in " habaynta nidaamyada dhaqaale iyo lacgeedba"(qod.54aad.faq.4aad) ay ka mid tahay awoodaha u gaarka ah Golaha wakiillada;
- Faq.3aad xarafka (t) oo tilmaamayain inay ka mid tahay hawlaha ugu muhiimsan xilgudasha baarlamanka in Jahuuriyadda Somaliland yeelato dhammaan xeerarka ay u baahan tahay;

Annaga oo ka soo taallabo-qaadayna xaqiiqad ah in aanay jirin xeerar jidaynaya ama xadaynaya mushahaarooyinka iyo gunnooyinka:

- Golayaasha Xeer Dejinta qaranka,
- Madaxweynaha iyo Madaxweyne-ku-xigeenka
- Madaxda Kale ee qaranka sida ay waajibinayaan Qod. 47aad, 65aad iyo87aad 98aad farqadiisa 3aadiyo qodobbo kaleba;

Annaga oo yaqiinsan kana duulayna baahida loo qabo in la xadeeyo lana cayimo mushahaarooyinka, gunnooyinka iyo xuquuqda kale Ee ay yeelanayaan Madaxda qaranku, si loo adkeeyo ku-dhaqanka mabaadiida asaasiga ah ee dimuqraaddiyadda ee wada-xisaabtanka iyo daah-furnaanta (accountability and transparency) ee Jamhuuriyada Somalilan

Annaga oo aaminsan inay tahay waajibaadka saasiga ah ee Golaha Wakiillada sidii loo xakamayn lahaa musuqmaasuqa, xoojinta iyo toosinta maamul-wanaagga iyo ku-dhaqanka sharciga (Good governance and rule of law) Qawladda Somaliland;

Annaga oo cuskanayna raacaynana xeer-hoosaadka Golaha:

- Qod.3aad oo muujinaysa in Goluhu "u xilsaaran yahay dejinta, hubinta iyo dhowrista sharciyada dalka..";
- Qod.37aad faq.1aad iyo 2aad oo bannaynaya in mudanayaashu ay xaq u leeyihiin inay Golaha soo hordhigaan soo-jeedinno (motions), haddii ay tiradoodu dhan tahay kow iyo toban (11) xubnood, soo-jeedintuna qoraal tahay:

Waxannu Golaha soo hordhigaynaa una soo jeedinayna inuu ka doodo, ansixiyona xeerka xadaynta mushaharka iyo gunnooyinka (kaasoo aanu u qaybinay laba qaybood oo isku lifaaqan) iyo xuquuqda kale ee ay yeelanayaan :

- a) Madaxweynha Jamhuuriyadda Somaliland
- b) Madaxweyne-ku-xigeenka Jamhuuriyadda Somaliland
- c) Guddoomiyaha Golaha Guurtida ee Jamhuuriyadda Somaliland
- d) Guddoomiyaha Golaha wakiillada ee Jamhuuriyadda Somaliland
- e) Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad iyo 2aad ee Golaha Guurtida Somaliland
- f) Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad iyo 2aad ee Golaha wakiillad Jamhuuriyadda Somaliland
- g) Xubnaha Golaha Guurtida Jamhuuriyadda Somaliland
- h) Xubnaha Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland.
- i) Xubnaha Golaha Wasiirrada Jamhuuriyadda Somaliland
- j) Iyo Madaxda Sarsare Ee qaranka

Alla Mahad leh.